WARSIDAHA AGA

AGA NEWSLETTER

Tirsi Gaar ah Maamuusidda Marxuum Afrax

WAA WARSIDE-XILLIYEED KU HADLA CODKA AKADEEMIYE-GOBOLEEDKA AFSOOMAALIGA (AGA)
A PERIODICAL NEWSLETTER PUBLISHED BY THE INTERGOVERNMENTAL ACADEMY OF SOMALI LANGUAGE

TIRSIGA 16AAD, SANNADKA 4AAD, OKTOOBAR– DIISAMBAR 2021
Vol. 4, No. 16, Oct— Dec 2021

TUSMADA TIRSIGAN

ERAYGA TIFAFTIRKA

Maantana Waxaa Godgalay U-Hiilliyihii Afka Hooyo!……..Bogga 2aad

QORMOOYIN HORTABIN MUDAN

Ereyga Madaxweynaha Jabuuti ee Tacsida Dr. M. D. Afrax…….. Bogga 3aad
Dr Maxamed Daahir Afrax: Dhalashadiisii, Waxbarashadiisii iyo Qalinkiisii……Bogga 4aad
Marxuum Afrax: Xirfad-nooleeye Mujtamaca u Faa`iideeya ……Bogga 4aad
Afrax Wuxuu Ahaa "Qoraa"...Bogga 5aad

TACSIDA & ERAYADA BAROORDIIQDA

Tacsida Masuuliinta ……..Bogga 7aad
Erayada baroordiiqda ……..Bogga 9aad

WARAR KALE OO XUSID MUDAN

AGA oo Xus iyo Xusuus Muqdisho ugu Samaysay Guddoomiyihii AGA ..B. 11aad
Xus iyo Duco Jabuuti loogu Samaysay Dr. Afrax……..Bogga 11aad
Somali Pen Muqdisho oo Xus iyo Xusuus ugu Samaysay Dr Afrax……..Bogga 12aad

KORORSO AQOONTAADA

Odhaaho laga Reebay Dr. Maxamed Daahir Afrax……..Bogga 13aad

SUUGAANTA & HAL-ABUURKA

Mahuraan Baroordiiqdu!....Bogga15-18aad
Kariimku ha kuu Gargaaro..Bogga 18aad
Maantana Dayax baa Galbaday ..B.19aad
U Hiilliyihii Afka……..Bogga 19aad

GOOSANKA TIFAFTIRKA

Tifaftiraha Sare
Mustafa C.Fayruus

Agaasimaha
Axmed M.Dhicisow

Agaasimaha Farsamada
Axmed Faarax Saalax

Kaaliyaha Farsamada
Amiin Yuusuf Khasaaro

Xoghayaha Tifaftirka
Saynab Xaaji Axmed

Bahda Tifaftirka
Cabdullaahi Shiiqaalow
Cabdiraxmaan Abtidoon
Cabdullaahi Sh. (Gacanka)
Dayax Axmed Ilay

Kala xiriir : info@aga.so
Facebook: @aga.afsoomaali
Twitter:@somaliacademy
Website :www.aga.so

HADAFKAYAGU WAA HIILKA AFKA HOOYO IYO HAL-ABUURKIISA

Ku soo Dhowaada Warsidaha AGA!

Warsidaha AGA waa warside-xilliyeed ay soo saarto Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaligu (AGA), oo idiin soo gudbiya aqoon isugu jirta xog-wadaag, aqoon-wadaag iyo talo-wadaag.

Warsidahan ujeeddooyinka loo aasaasay waxaa ka mid ah in uu ehelada afka, hal`abuurka, dhaqanka, qoraalka iyo aqoon-faafinta ee daafaha dunida kala jooga la socodsiiyo hawlaha muhiimka ah ee ku saabsan arrimaha kor ku xusan. Warsiduhu wuxuu ururiyaa, kaydiyaana dhacdooyinka muhiimka ah iyo waxqabadka arrimaha kore.

Wixii ah fikrado iyo talobixin ku saabsan sii hagaajinta, hannaaninta iyo horumarinta warsidahan aad ayaan u soo dhoweynaynaa.

Sidoo kale, gacmo furan ayaan ku soo dhowaynaynaa qoraallada ay soo gudbiyaan qalinleyda iyo ehelada Af-Soomaaligu.

***Warsidahani wuxuu ku soo baxaa nuqul daabacan iyo mid elektoroonig ah* (eeg www.aga.so).**
Cinwaanka lagala soo xiriirayaa waa Email: info@aga.so



Dr. Maxamed Daahir Afrax (1952-2021)
Hawlkar iyo qoraa hibo leh

ERAYGA TIFAFTIRKA

Maantana Waxaa Godgalay U-Hiilliyihii Afka Hooyo!

Ilaahay naxariistii janno hawgu deeqo e, maantana waxaa innaga baxay Dr Maxamed Daahir Afrax (1952-2021). Fiidnimadii 09/10/2021 ayuu ku geeriyooday London (UK). Halkaa waxay ummadda Soomaaliyeed ku weyday tiir udub-dhexaad u ahaa u hiillinta afka hooyo iyo hal-abuurkiisa.

Sooyaalka marxuumku wuxuu ku suntanaa waxqabad soo taxnaa muddo nus qarni ah. Wuxuu raadeeyay qalinka iyo hal-abuurka suugaaneed ee Soomaalida; wuxuuna reebay dhaxal-cilmiyeed mug leh. Bal, aan isku dayno in aan waxqabadkaa dhawr qodob ka tilmaanno.

Afrax wuxuu ahaa jidbixiyihii abaqaalay falkinta sheeko-faneedda casriga ah. Waxaa maskaxdiisa ka soo maaxday sheekooyin ay ugu magac-dheer tahay Qisada Maana-faay, oo ibafur u noqotay qoridda sheeko-faneed si buuxda u casriyaysan; uuna ku tilmaamay Bare Sare Andrzejewski (1922–1994), oo ku xeeldheeraa Af-Soomaaliga iyo suugaantiisu, inay *“suugaanta Soomaalida gaar-siisay maqaamkii ay ka mudneyd suugaanta caalamka.”*

Afrax wuxuu bilaabay cilmiga faaqidaadda suugaanta Soomaalida. Waxaa gundhig u ahaa maqaallo uu ku qori jiray wargeysyadii Xiddigta Oktoobar iyo Halgan sannadihii 1979-1981. Gadaashiina wuxuu ka qoray buugaagta: *“Fan-masraxeedka Soomaalida: Raadraac Taariikheed iyo Faaqidaad Riwaayado Caan-baxay”* (1987), *“Maadeys: Faaqidaad Riwaayadihii ugu Caansanaa Masraxa Soomaalida”* (weli lama daabicin), iyo daraasaddiisa PhD-da ee *“Between continuity and innovation: transitional nature of post□ independence Somali poetry and drama”* (2013).

Kaalin muuqata ayuu marxuumku ku lahaa hodminta erayga qoran. Markii Far-Soomaalida la hirgeliyayba, wuxuu soo saaray wargeyskii *“Codka Jubba”*, oo uu bilaabay Noofembar 1972, sidaasna ku noqday *“qofkii soo saaray wargeyskii ugu horreeyay ee Af-Soomaali ku soo baxa”.* Markuu dalka Ingiriiska tegey, wuxuu sannadkii 1993 bilaabay Wargeyskii Hal-abuur, oo ahaa wargeys-xilliyeed isku hawla ururinta, lafagurka iyo faafinta suugaanta.

Wuxuu dhidibbada u taagay in Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaligu soo saarto “Taxanaha Darsidda Afka iyo Suugaanta Soomaalida”; oo lagu bilaabay buugga “Afmaal” oo la daabacay 2015. Sidoo kale, marxuumku wuxuu lafdhabar ka ahaa, fikrad ahaan iyo fulin ahaanba, bilaabidda iyo hirgelinta bandhigyada buugaagta.

Qaranjabkii Soomaaliya ka dib, markay meesha ka baxeen hay`adihii u xilsaarnaa Af-Soomaaligu, dayac baaxad leh iyo culaysyo kala duwan ayaa soo wajahay Af-Soomaaliga iyo adeegsigiisa. Dr Afrax wuxuu dusha u ritay inuu hawshaa wax ka qabto; wuxuu abaabulay hay`ado isu taaga u-hiillinta afka hooyo; kana shaqeeya kobcinta iyo tayaynta adeegsigiisa. Waa dadaalka ay ku arooraan Naadiga Qalinleyda iyo Hal-abuurka Soomaaliyeed ee Somali-Pen, oo uu London ku asaasay 1997; Guddiga Af-Soomaaliga ee xuduudaha ka tallawsan ee Akadeemiyada Afrika ee Afafka (ACALAN), oo Jigjiga lagu dhisay 2011; iyo Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga oo Jabuuti lagu yagleelay 2013.

Dhinaca kale, wuxuu soo noqday xildhibaan 2000-2004 ee baarlamaankii lagu soo dhisay Carta, iyo wasiiru-dawle isla xukuumaddii xilligaa. Hadda wuxuu ahaa guddoomiyaha guddiga madaxa bannaan ee dibu-eegista dastuurka.

Guntii iyo gabaggabadii, marxuumku wuxuu ahaa haldoor maskaxmaal ah, oo ummaddiisa u adeegay, kuna astaysnaa inuu yahay “madhaafaankii suugaan-tiraabeedda Soomaalida” iyo “u-hiilliyihii afka hooyo”. Wuxuu ka mid noqonayaa haldoorka, waxqabadkiisa darteed, ay Soomaalidu isku samirsiiso “Ma dhimane wuu dhuuntay”. Marxuumku wuxuu ka daba tegey haldoorro magac iyo muunadba lahaa oo geeridoodu innagaga nixisay bilo isu dhow. Eebbe weyne haw naxariisto, qabrigana haw waasiciyo, hana ka mid dhigo kuwa kitaabkooda midigta laga siiyo. Aamiin.

Tirsigani wuxuu u gaar yahay maamuusidda marxuum Maxamed Daahir Afrax .

W. Q

Mustafa Fayruus

QORMOOYIN HORTABIN MUDAN

Wuxuu Naftiisa u Hibeeyay Ummaddiisa

“Ereyga Madaxweynaha Jabuuti ee Tacsida Dr. M. D. Afrax”

Innaa lilaahi wa innaa ileyhi raajicuun… Dr. Afrax aniga oo tiiraanyaysan ayaan ka hadlayaa, Alle ha u naxariisto oo jannada ha geeyo ayay tahay inuu hadalkeennu ku koobnaado.

Walaalkeen Dr. Afrax, waxa aan is baranay waqti aan dhaweyn isaga oo Cadan ka yimid bilowgii 1980tannadii, halkaa xidhiidhkii ka bilowday ayaan isku soo gaadhnay ilaa geeridiisa, oo aanan kala faaruqin; oo kolba mashruuc uu wado aan la wadnay annaguna, haddii ay tahay shaqo uu gacanta ku hayay markaa oo ahayd Carabiga iyo Soomaaliga, dhaqannadooda iyo qoraalkooga, siday isugu dhaw yihiin.

Xagga Soomaaliyana, hawl badan ayuu ka qabtay ilaa [buuggiisii] Maana Faay uu caan noqday. Kabacdi dhulka Ingiriiska ayuu tegey, oo uu PhD ku soo dhamaystay. Waxa uu jeclaa, oo uu halgan dheer ugu jiray dhaqanka iyo afka Soomaaliga. Waxa uu ku dadaali jirey sidii afka horey loogu marin lahaa, isaga oo hodan ah, oo gobolka Geeska Afrika caan ku ah, xidhiidhinaya ummado dawlado badan ka dhaxeeya, isku soo dhowaynaya, [oo] ummad qudhahaati ka dhigaya; haddii xadhiggaasi go`o wuxuu aaminsanaa inaan ummaddan dib loo arki doonin. Waxa aan is leenahay, meesha uu ka tagay way adkaan doontaa [in] aan u helno qof meeshiisii geli kara, koleybase, wacad wuxuu ku hadhay, bay Soomaalidu tidhaahdaa, ninkii nool.

Naxariista Alle aan u baryayno ka sokow, waa inaan tilmaannaa, wixii aan ka ogeyn hawlihiisaa… wixii uu Soomaali ku qoray, qaar uu Af-Carabi ku qoray iyo qaar uu Ingiriisi ku qoray, intuba way yaallaan.

Ugu dambeyn, waxaan ku wada jirnay hawl kale oo la xidhiidhsan wixii waxqabad u baahan, sidii loo badbaadin lahaa sida afka Soomaaliga, maadaama ay dawladdo kala duwan ay ku dhex nool yihiin Soomaalidu. Wax xidhiidhiya, ama af-koogii nooleeya, ama meel xarun u noqoto afka in la abuuro ayaan ku talinay markii aan ka hadlaynay 40-jirkii qorista afka Soomaaliga. Mashruucaa wuu ka hadhi waayay marxuumku, annaguna waan la wadnay. waxa aan abuurnay, kol haddii uu dawladdo badan ka dhaxeeyo, in loo sameeyo meel sal uu dhigo: lagu ururiyo koow, lagu baahiyo waa laba, lagu ilaaliyana waa saddex; meel aan ku qabsan karno hawshaasi, oo dadka oo dhan ay iska wada dhex arki karaan, oo aan la odhan Af-Soomaaliga reer hebel ama Af-Soomaaliga dawladdaasi yaan ku heshiinay; waa lanala ogaalaaday. Hawshaana gacanta ayuu ku hayay iminka, Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga ayaan u bixinay, oo Muqdisho, hoygii af Soomaaliga, ayaan [xarun] uga dhignay. Dhismayaal badan buu u baahan yahay, dhismihii ugu horeeyay annagaa maalgalinay, wali ma dhamaan baan u malaynayaa. Somali-Pen-na isagaa ka aabbe ahaa, nagu gargaarayna inaan Cafar-Pen aan ku daba xijisiino. Hawl aad iyo aad muhiim ah ayuu halkaana ka waday.

Hawlo kale ayuu Soomaaliya dhexdeeda ka waday, sida guddida dastuurka. Halkaana hawl weyn oo qiime leh ayuu ka waday. Maxaa yeelay, wuxuu ahaa nin isku hibeeyay, naftiisa u illoobay, af Soomaaliga iyo qarankaa Soomaalida, inuu ka gaysto waajibaadkiisa.

Waan soo koobaye, intaasaan ka sheegayaa marxuumka. Alle ha u naxariisto!

Waa eraygii tacsida ee
Mudane Ismaaciil Cumar Geelle
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Jabuuti

Madaxweynaha Jabuuti hiil joogto ah ayuu u yahay afka iyo dhaqanka

Dr Maxamed Daahir Afrax: Dhalashadiisii, Waxbarashadiisii iyo Qalinkiisii

Maxamed Daahir waxa uu ku dhashey degmada Jariiban gugii 1952kii. Halkaas ayuu Qur'aanka iyo bilowga diinta Islaamka ku bartey. Kaddib waxa uu u soo wareegay Muqdisho oo uu ka bilaabay waxbarahada.

Dugsiga hoose Xamarjajab ayuu ku qaatay, dhexe iyo sarena Jamaal Cabdinaasir oo "Allaahi" ku caan ahaa. Tacliinta sare, shahaadadda 1aad waxa uu ka qaatey Jaamacadda Cadan, Yaman; shahaadadda master-ka iyo digtoorada ama PhD waxa uu ku qaatay dalka Ingiriiska, gaar ahaan SOAS ee Jaamacadda London.

Maqaalkii ugu horeeyey ee uu qoro marxuumka waxa uu ahaa "Masraxeenu waa inuu iskuul u noqdaa bulshadeenna, ma aha inuu noqdo golemaaweelo", oo ku soo baxay wargeyska Najmatu Oktoobar, oo uu ku lahaa bogga "Almujtamacu Soomaal taxta mikriskoob". Kaddibna waxaa looga gacan haatiyey wargeyska Xiddigta Okoobar oo uu bog ku yeeshey. Sidoo kale wuxuu joogto wax ugu qori jirey wargeysyada Heegan iyo Halgan. Halkaa ayuu qalinka Dr Afrax ku ibafurtay, innoona reebay qoraallo isugu jira suugaan iyo qoraal-cilmiyeedyo ku kala qoran afafka Soomaaliga, Carabiga iyo Ingiriisiga.

Qoraalladiisa tisqaaday ee ku qoran AfSoomaaligu waxay isugu jiraan sheeko-faneedyo iyo qoraal-cilmiyeedyo. Sheeko-faneedyada waxaan ka xusi karnaa: Guur ku sheeg, Maana-faay, Galti-macruuf, Tala seeg, Ambad, Ha iman laheydaa!, Aniga annigii miyaa?, iyo Durbaan beena (Riwaayad). Qoraallada cilmiyeed waxaa ka mid ah: Fanmasraxeedka Soomaalida, Dal dad waayey iyo duni damiir beeshay, Maadeys (weli lama daabicin). Marxuumku wuxuu kaloo leeyahay maqaallo kala duwan oo uu qorayay muddadaa qalinkiisu irmaanaa.

W.Q. Macallin
C/laahi Sh. Cabdi "Gacanka"

Marxuum Afrax: Xirfad-nooleeye Mujtamaca u Faa`iideeyay

Waxa ugu weyn ee aan anigu Maxamed Daahir ku qadarinayo waa inuu ahaa dadka nooleeya xirfaddooda. Dadku waa "xirfad-ku-nool" iyo "xirfad-nooleeyayaal". Dadka qaarkiis waa xirfad ku nool, oo keliya rootigooda kala soo baxa laakiin xirfaddooda aan intaas wax ka badan ku darin. [Dadka qaarkiina waa "xirfad-nooleeyayaal"] xirfaddooda uga faa'iideeya mujtamaca, xuduuddeedana durkiya, oo baaritaan ku sameeya cilmiraadis iyo aqoon-kordhin awgeed. Dadkeenna aad bay ugu yar yihiin dadka noocaas ah. Maxamed Daahir wuxuu ahaa noocan "xirfad-nooleeyaha".

Dadkii [marxuumka faalleeyay] waxay sheegeen Maxamed Daahir Afrax inuu ahaa qoraa iyo inuu suugaanta Soomaalida faaqidaaddeeda xeeldheere ku ahaa. Laakiin anigu waxa [kale oo] aan u aqiin sifo saddexaad oo ah daryeelaha suugaanta Soomaalida.

Taas awgeed ayaan isku daynay, burburkii [dawladda dhexe ee 1991] kadib, sidii loo daryeeli lahaa suugaanta Soomaalida; oo waxa uu iigu yimid, waagii aan ka shaqeynayay UNESCO, sidii ay UNESCO Soomaalida uga caawin laheyd in la badbaadiyo suugaantooda oo dacdaraysnayd. Sababtaa ayuuna u abuuray Somali Pen iyo jariidaddii Hal-abuur.

Dr. M. D. Afrax waxa ay ila tahay in uu noqon doono qof dhallinyarada Soomaaliyeed ay matal u qaadan doonaan, dhinaca qoraalka iyo faaqidaadda suugaanta, sidii uu noloshiisa ugu gooyay durkinta xuduudda qoritaanka Af-Soomaaliga iyo faaqidaadda suugaanta.

Waa eraygii tacsida ee

Dr Cabdul-qawi Axmed Yuusuf
Guddoomiyihii hore ee
Maxkamadda Caddaaladda Dunida (ICJ)

Haldoor dhaxal reebay!

Shahaado-sharafyo lagu Maamuusay Marxuum Afrax

Dadaalkiisii u adeegidda afka hooyo iyo guud ahaanba hawlaha ummadda Soomaaliyeed darteed, Dr Mamamed Daahir Afrax waxaa lagu maamuusay billado iyo shahaadooyin sharafyo, waxaana ka mid ah:

09/09/2018: Golaha Abwaannada Soomaaliyeed ayaa guddoonsiiyay, hawliliisii wacyigelinta iyo nabadaynta ummadda; Muqdisho

14/02/2019: Jaamacadda Kismaayo ayaa guddoonsiisay, isu-xilqaamiddiisa daryeelka afka iyo aqoonta darteed; Kismaayo.

23/03/2019: Ururka Horumarinta Dhaqanka iyo Af-Soomaaliga (HADHSO) ee dalka UK ayaa guddoonsiiyay; dadaalkiisa afka, dhaqanka iyo hal-abuurka Soomaaliyeed darteed; Bristol (UK).

08/06/2019: Ururka Haweenka Soomaaliyeed ee UK ayaa guddoonsiiyay kaalintiisa hormuudnimo ee u adeegidda afka hooyo iyo hal-abuurkiisa darteed; London (UK).

27/10/2020: Jaamacadda Bariga Afrika ayaa guddoonsiisay, kaalinta uu ka qaatay horumarinta afka iyo dhaqanka Soomaaliyeed iyo yagleelidda Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga darteed; Garoowe.

15/11/2020: Xarunta Haldoor ayaa ku maamuustay billad-sharaf, dadaalkiisa mintidnimo ee dib u nooleynta dawladnimadii Soomaaliyeed, horumarinta Af-Soomaaliga iyo hal-abuurkiisa, iyo dhiirrigelinta qoraalka iyo qorayaasha darteed; Muqdisho.

24/11/2020: Naadiga Qalinleyda iyo Hal-abuurka Soomaaliyeed (Somali Pen), laanta Muqdisho, ayaa guddoonsiiyay; kaalinta weyn ee uu ka qaatay horumarinta afka iyo hoggaamintiisa Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga darteed; Muqdisho.

07/02/2021: Jaamacadda Jabuuti ayaa guddoonsiisay; dadaalkiisa, hawl-karnimadiisa iyo kaalinta weyn ee uu ka qaadato horumarinta afka Soomaaliga iyo hal-abuurkiisa darteed; Jabuuti.

09/08/2021: Naadiga Qalinleyda iyo Hal-abuurka Soomaaliyeed (Somali Pen), laanta Muqdisho, ayaa guddoonsiiyay; aasaasiddii iyo taabbagelintii Naadiga Somali Pen guddoomiyihii koowaad darteed; Muqdisho.

Ilaahay haw naxariisto marxuumka.

W. D

Saynab Xaaji "Ugbaad"

Afrax Wuxuu Ahaa “Qoraa”

Meel walba oo ay Soomaaliyi joogto ayaa Maxamed Daahir Afrax laga xusay oo looga damqaday. U malayn maayo goor dhaw inuu jiro shaqsi loo xusay sida Maxamed oo kale. Tani waxa ay ku tusaysaa inuu ahaa qof qiimo leh, oo wax innoo dhaafay.

Kaliya waxa aan ku dari lahaa muxuu Afrax qiimo ku yeeshay?

Waxa uu qiimo ku yeeshay qiimaynta afka hooyo. Tani waxa ay si dadban kuu tusaysaa in maanta af Soomaaligii aad loo qiimaynayo. Dad badan oo khubaro ahaa, oo xitaa cilmibaaris sameyn jireen, sidaan oo kale hore looguma qiimeyn, sababta oo ah, waxa ay baarayeen ayaan sidaa loo fahmin.

Dr. Maxamed Daahir Afrax, anigu waxa aan siin lahaa title ah “qoraa”.

Waxaa xusid mudan, qof kasta oo buug qora maaha inuu “qoraa” yahay. Taas waxa u daliil ah xagga luqadda hadaan fiirino ama aan baarno magacyada ku dhamaanayo “-aa”-da dheer waxay muujinayaan in la siiyo qof xirafadiisa ku xeel dheer.

Marka aan leenahay “gabyaa” waa qof ku xeel dheer hal-abuurka gabayada, ma aha nin hal gabay tiriyay; “jilaa” marka aad leedahay waa qof shaqadiisa jilaannimo xariif ku ah; marka aad leedahay “heesaa” waa qof ku caan noqday, sida Xasan Aadan oo kale. Erayada “dilaa” iyo “dile” laba ayay kala yihiin; “dilaa” waa mid gumaada dadka ama xayawaanka. Sidaas darteed, haddaad u fiirsato ereyada “-aa” ku dhamaada waxay muujinayaan in qofkaas uu xirfadaas khabiir ku yahay.Qoraa ha laga daayo qofkiiba buug qoray.

“Qoraa” waa kan si xirfad ahaana u qora buugga dadka oo dhammi u dhegaraariciyo isla markaana loogu guuxo, kaas ayaa qoraa ah. Marka, waa in la kala saaraa qoraa iyo qore, qoraa waa qofka Novalistiga ah ee yaqaana afka, sida ninka biraha tuma oo kale, ee siduu rabo ka dhigaaya. Qofka noocaas oo kale waa in qoraa la yiraahdo. Qore iyo qoraa ayaa la kala yahay.

Haddaba, anigu, Dr. Maxamed Daahir Afrax waxa aan siin lahaa martabadda ah “qoraa”; waxana aan ka dhigi lahaa qoraaga koowaad ee Af-Soomaali wax ku qora.

Ugu dambeyn, Ilaah ha u naxariisto Maxamed Daahir, wixii uu dhaafayna Alle ha naga dhigo kuwo ka faa’iidaysta.

Dr Cabdalla Cumar Mansuur
Xeeldheere Af-Soomaaliga,
iyo Maqaawiirta AGA
Jaamacadda Roma Tre, Italy





ERAYADA TACSIDA & BAROORDIIQDA

Tacsida Madaxweynaha JFS Md Maxamed C/laahi Farmaajo

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, Md Maxamed Cabdullaahi Farmaajo ayaa tacsi tiiraanyo leh u diray qoyska, qaraabada iyo dhammaan ummadda Soomaaliyeed ee uu ka baxay Alle ha u naxariistee, guddoomiyihii Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga, Marxuum Maxamed Daahir Afrax oo ku geeriyooday Magaalada London.

"Innaa lillaahi wa Innaa Ileyhi raajicuun. Waxa aan tacsi u dirayaa qoyska, ehelada iyo guud ahaan shacabka Soomaaliyeed ee uu ka geeriyooday, Alle ha u naxariistee, Marxuum Maxamed Daahir Afrax oo ahaa qoraa kaalin weyn ka soo qaatay horumarinta afka iyo dhaqanka Soomaaliyeed, isaga oo ummadda uga tagay dhiganeyaal dhaxal reeb ah." ayuu yiri Madaxweynaha oo marxuumka Alle uga baryay in uu jannadiisa ka waraabiyo.

Tacsida R/Wasaare XFS Md Maxamed Xuseen Rooble

Waxaan qoyska, asxaabta iyo guud ahaan ummadda Soomaaliyeed uga tacsiyeynayaa geerida Allaha u naxariiatee Dr. Maxamed Daahir Afrax oo ahaa Guddoomiyihii Akadeemiye- Goboleedka iyo Guddiga Dibu-eegista Dastuurka. Marxuum Afrax waxa uu ahaa aqoonyahan iyo qoraa ku xeel dheer afka iyo dhaqanka, wax weyna ku biiriyay horumarinta qoraalka afkeenna hooyo. Marxuumka Alle Jannadiisa ha ka waraabiyo, ehelka iyo ummaddana sabir iyo Iimaan ha ka siiyo.

Tacsida Guddoomiyaha Aqalka Sare BFS Md Cabdi Xaashi Cabdillaahi

Guddoomiyaha Aqalka Sare, Md Cabdi Xaashi ayaa tacsi tiiraanyo leh u diray dhammaan ummadda Soomaaliyeed, gaar ahaan qoyska iyo qaraabada uu ka geeriyooday Alle ha u naxariistee Dr Maxamed Daahir Afrax oo ku geeriyooday Magaalada London. Guddoomiyaha ayaa marxuumka Alle uga barayay in uu jannatul Fardowsa ka waraabiyo, samir iyo iimaanna uu ka siiyo dhammaan ummadda Soomaaliyeed, gaar ahaan qoyskii iyo eheladii uu ka baxay.

Tacsida Madaxweyne Hore Md Sheekh Shariif

Madaxweynihii hore ee Soomaaliya, ahna murashax madaxweyne, Md Shariif Sheekh Axmed ayaa tacsi u diray guud ahaan ummadda Soomaaliyeed, qaas ahaan qoyska iyo qaraabada uu ka baxay AHUN Dr. Afrax. Shiikha ayaa xusay in marxuumku ahaa halyeey u taagan nooleynta afka iyo dhaqanka Soomaaliyeed, isaga oo Alle uga baryay inuu Jannada ka waraabiyo.

Tacsida R/Wasaare Hore Xasan Cali Khayre

Ra'iisal-wasaarihii hore ee XFS, Md Xasan Cali Khayre, ayaa geerida Dr. Maxamed Daahir Afrax uga tacsiyeeyay qaranka Soomaaliyeed. Xasan Cali Kheyre ayaa sheegay in Dr Afrax uu maal iyo maskax ku bixiyay sidii loo nooleyn lahaa Afka Soomaaliga ilaa uu ku hammiyay dhisme ay leedahay Akadeemiye-Goboleedka in laga dhiso Muqdisho. Wuxuu ku tilmaamay marxuumka naftiihure ku sifoobay hawlkarnimo iyo qaran jacayl.

Tacsida Wasiirka Warfaafinta, Dhaqanka & Dalxiiska ee XFS Md Cismaan Abokor Dubbe

Dr. Maxamed Daahir Afrax noloshiisa oo dhan wuxu u hibeeyey ka shaqaynta afka iyo dhigaalkiisa. Waxa uu la taariikh noqonayaa aabbayaashii afka sida Kadare, Galaal, Keenadiid, Shire, Hadraawi, iyo Cabdalla Mansuur. Ilaahay ha u naxariisto Afrax; ehelkiisii, asxaabtii iyo Ummadda Soomaaliyeed-na samir iyo iimaan ha ka siiyo. Aamiin.

Tacsida Guddoomiyaha G/Banaadir Md Cumar Filish

Guddoomiyaha Gobolka Banaadir, ahna Duqa magaalada Muqdisho, Md Cumar Maxamuud "Filish" ayaa ka tacsiyeeyay geerida Dr. Maxamed Daahir Afrax. Cumar Filish ayaa sheegay in marxuumka uu uga tagay ummadda Soomaaliyeed dhaxal cilmiyeed aan gureyn iyo dhiganayaal waxtar badan u leh shacabka Soomaaliyeed, isaga oo u rajeeyay in uu Alle Jannada geeyo.

Tacsida Guddoomiyaha Abwaannada Abwaan Xirsi-Dhuux

Guddoomiyaha Golaha Abwaannada Soomaaliyeed Abwaan Xirsi-Dhuux Maxamed ayaa ka tacsiyadeeyay geerida Dr Afrax; wuxuuna ku tilmaamay haldoor qaran oo mudan in meel loogu magacdaro; wuxuuna Eebbe uga baryay naxariistii Janno.

Tacsida Madaxweynaha Puntland Md Siciid C/laahi Deni

Madaxweyne Siciid Dani ayaa tacsi u diray guud ahaan ummadda Soomaaliyeed, gaar ahaanna qoyska uu ka baxay AHUN Dr Maxamed Daahir Afrax. "Waa tiir weyn oo ka baxay ummadda Soomaali-yeed, waxa uu ahaa aqoonyahan door weyn ka soo qaatay horumarinta afka iyo dhaqanka." ayuu yiri Saciid Deni oo marxuumka Alle uga baryay in uu Jannada geeyo.

Tacsida Madaxweynaha Jubbaland Md Axmed Madoobe

Madaxweynaha Dawlad-goboleedka Jubbaland Md Axmed Maxamed Islaan "Axmed Madoobe" ayaa tacsi u diray guud ahaan ummadda Soomaaliyeed, gaar ahaanna qoyska iyo qaraabada uu ka baxay AHUN Dr Maxamed Daahir Afrax. Madaxweynaha Jubbaland ayaa marxuumla Alle uga baryay in uu Jannadiisa geeyo, qoyskii iyo ummaddii uu ka baxayna uu samir ka siiyo.

Tacsida Guud ee Bahda Afka, Dhaqanka & Aqoonta

Masuuliinta iyo hawlwadeennada **Akadeemiye-goboleedka AfSoomaaliga (AGA)**, oo ay horkacayso kuxigeenka 1aad ee guddoomiyaha AGA, ahna kusimaha, xildh Maryan Cariif Qaasim; Masuuliinta iyo xubnaha **Naadiga Qalinleyda iyo Hal-abuurka Soomaaliyeed (Somali- Pen)**, oo uu horkacayo guddoomiyaha, mudane Ismaaciil Xuseen Taani; Masuuliinta iyo xubnaha **Golaha Abwaannada Soomaaliyeed (GAS)**, oo uu horkacayo guddoomiyaha, abwaan Xirsi-Dhuux Maxamed; Naadiyada akhris-qoraalka, xarumaha dhaqanka iyo suugaanta, Jaamacadaha, iyo guud ahaanba bahda aqoonta iyo cilmigu; iyagoo ka murugaysan geerida ku timid marxuum M. D. Afrax, waxay uga tacsiyaynayaan dhammaanba ummadda Soomaaliyeed, gaar ahaan ehelkii iyo qoyskii marxuumka, iyo guud ahaanba bahda qalinleyda, hal-abuurka iyo aqoonta. Marxuumka waxay Ilaahay uga baryayaan inuu dembigiisa dhaafo, qabriga u waasiciyo, kitaabkiisa midigta ka siiyo, uguna deeqo Jannatu-Firdowsa.

Erayada Baroordiiqda

Haldoor loo Gablamay

Wuxuu ahaa halyey u guntaday afka hooyo inuu hormariyo, si uu ula jaanqaado afaf kale ee hore u maray. Wuu isku fideeyey afka hooyo, oo noloshiisa oo dhan wuxuu isku hawlay naftiisana u hibeeyey. Wuxu ahaa haldoor loo goblamey.

Marxuumku wuxu ahaa qof iyo shaqsiyad gaar ah, wuxu lahaa abuur gooniya oo dhif u yahay ruux lagu arko ama ay ku kulmaan sifooyinka: indheergarad, aqoonyahan, aygarad, afmaal, hal-abuur, qoraa, hoggaamiye, gabay-dhaari iyo sifoonyin kale oo badan.

Ilaahayow u naxariiso oo Jannadii Firdowsa geli. Aamiin

Abwaan Xaashi Cabdillaahi Orrax
Maqaawiirta AGA, Jabuuti

Ilaahay ayaa Innaga Jeclaaday

Maxamed Daahir geeridiisu waxay nagu noqotay geeri qarracan iyo naxdin leh. Saacaddiisaa dhammaatay, Ilaahay ayaana innaga jeclaaday. Ilaahay qabriga haw waasiciyo.

Maxamed Daahir Afrax wuxuu dadaal badan geliyay u adeegidda afkeenna hooyo. Ilaahay ajar iyo xasanaad ha ka siiyo hawlahaa uu ummadda ugu adeegayay ee uu waqtigii ugu badnaa noloshiisa ku soo bixiyay. Shaqsi ahaan, Maxamed waxa uu ahaa qof sabir badan, aamusnaan badan, aan dhib laheyn. Wuxuu ahaa qof in lala shaqeeyo loo soo xiisayo, in wax lala qabtana aad habeenno dhan u soo jeedi kartid.

Dhammaanteen sabar iyo iimaan Alle ha naga siiyo, qoyska oo dhan Eebbe qalbigooga haw qaboojiyo.

Xildh Maryan Cariif Qaasim
Guddoomiye-ku-xigeenka AGA,
Ku-simaha Guddoomiyaha AGA, Muqdisho

Karti Sare iyo Hogaamin Hufan

Dr Maxamed Daahir Afrax (IHN) waxaan is naqiin muddo dheer. Waxaan ka wada shaqaynay ururrada AGA iyo ACALAN (African Academy of Languages). Muddadaas waxuu muujiyay karti sare iyo hoggaamin hufan! Waxaa marqaati u ah waxqabadkiisa faraha badan, qoraalladiisa dhaxalgalka ah, halgankii dheeraa ee horumarinta afka hooyo, dhismaha ururrada daryeela Af-Soomaaliga (Somali Pen, AGA, Gudiga Af-Soomaaliga ee ACALAN), hirgelinta barnaamijka Af-Soomaaliga heer jaamacadeed ee Jaamacadda Jigjiga. Marka la soo koobo, Dr Afrax waxuu ahaa shakhsi Eebbe siiyay karti maskaxeed, dabci wanaagsan, aqoon qoto dheer iyo hawlkarnimo. Jannadi Firdoowsa Eebbe ha ugu deeqo! Aamiin!

Dr. Cabdinaasir Axmed Ibraahim
Guddoomiye-ku-xigaanka AGA, Addis Ababa

Liicaa-ma-jabe Dad-isku-wad leh

Waxaan ku bartay qisadiisii Maana-faay iyo wareysiyo teelteel ah oo ku saabsanaa suugaanta. Waxaanse fool-ka-fool isu barannay May 2000. Laga bilaabo 2011 waxaan isugu nimid shaqooyinka loogu hiillinayo Af-Soomaaliga, lixdii sano ee u dambaysayna waxaan lahayn wada shaqayn joogto ah.

Waxaa lagu xusuusan doonaa inuu ahaa “madhaafaankii suugaan-tiraabeedda Soomaaliyeed” iyo “u-hiilliyihii afka hooyo”.

Wuxuu ahaa nin shakhsiyad macaan, dabeecad wanaagsan, aragti dheer, hawsha aan ka daalin, yaqaan kana go`antahay waxa uu qabanayo, hoggaamiye dad-isku-wad leh, caqabadahana u ah liicaama-jabe.

Waa geeri culus aanse la hurayne, Ilaahay naxariistii Janno hawgu deeqo marxuumka.

Mustafa Fayruus
Guddoomiye-ku-xigeen Naadiga Somali Pen
La-taliye Sare Akadeemiye-goboleedka AfSoomaaliga,

Wuxuu ku Aamusnaa Waxqabad!

Marxuum Maxamed Daahir Afrax waxa uu ahaa mutacalim horumariya afkeena hooyo. Waxa uu wax baray dad badan oo anigu aan ka mid ahay. Maskaxda wax lagu hogaamiyo ayuu dadka ka dhisi jiray, afka la dayacay inuu wax ka qabto ayuu caan ku ahaa. Wuxuu kaloo ahaa sheeko qore macruuf ah. waxa uu ahaa nin ku aamusnaa waxqabad. Afrax waxa uu ahaa nin ixtiraam badan, ballan leh, shaqadiisa ka adag, dulqaad badan, oo jecel dadka la shaqaynaya in ay isku fiicnaadaan, dhibtooda u dulqaata, shaqada isha ku haya. Wuxuu ahaa aqoonyahan kaalin weyn ka gaystay dib u dhiska dawladnimadii Carta, raggii u gogol dhigay ayuu ka mid ahaa. Ilaahay haw naxariisto.

Md Axmed Ciise Cawad
Wasiirkii Arrimaha Dibadda Soomaaliya

Dhaxal Togan iyo Hawlkar Kuhirasho leh

Dr Maxamed Daahir Afrax waxaa lagu xusuusanayaa waxtarka lagu intifaaci doono. Waa sheekooyinka iyo qoraallada uu inoo reebay. Waxaa intaas wehelisa horseedka uu ka ahaa ururinta iyo weelaynta fikirka iyo aqoonta oo ku suntan asaasiddii wargeyska Halabuur; ururrada Somali-Pen iyo Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga (AGA). Waxaa ku laba ah oo lagu xusuusan doonaa qofnimadiisii ahayd tusaale kuhirasho leh. Waxa uu ahaa talogoosi go'aan adag leh, hawlkar aan shaqo iyo waxqabad ka daalin, lehna sabir iyo dulqaad. Waxa uu ahaa nin dhibaatooyinka iyo caqabadaha u babacdhiga. Alle ha u naxariisto. Haddii uu ifka ka tegey waxqabadkiisii baa nool.

Rashiid Sh. Cabdillaahi "Gadhweyne"
Sheffield (UK)

Soomaalinnimadu Way ku Weyneyd

Ilaahay Afrax ha u naxariisto. Markuu soo dhacay waxaan ku ballansanayn inaan ku kulanno meel ka mida magaalada Birmingham, UK. Ma dhicin! Rabbi siduu rabey ayaa dhacday. Wuxuu ahaa shakhsi Soomaalinnimadu ku weyn tahay. Mar kale Eebbe ha u naxariisto.

Qoraa Axmed Faarax Cali "Idaajaa"
Maqaawiirta AGA & SSPEN

Aragti-dheere Dhiirran

Rabbi ha u naxariisto e, Dr. M. D. Afrax, waxa uu ahaa geesi aan ka baqan dhiibashada aragtidiisa. Waxa uu ahaa aragti-dheere aragti toolmoon leh. Waxa uu ahaa qofkii ugu horreeyay ee tiraab qoran ku cabbira, kuna tilmaama qallooca siyaasadda. Waa dhiirranaan iyo aragti aanay in badani lahayn. Waa aabbihii hal-abuurka sheeko-faneedda casriga ah ee Soomaalida. Dr Afrax, geeridiisu waxa ay noo ahayd naxdin iyo murugo, balse waxa uu innooga tegey raad qurxoon oo abid jiri doona.

Xuseen M. Cabdulle "Wadaad"
Guddoomiyaha Laashin
Wakiilka AGA ee Sweden

Rafiiqa Dhallinyarada

Koox dhallinyaro ah oo sheekada "Maana-faay" ay dareenkoodii kicisay ayaan ka mid ahaa 1980kii, waxaanan si dadban rafiiq soke ula noqonnay, annagoon weli arag, Maxamed Daahir oo aan ugu yeeri jirnay oo keliya "Afrax". Wuxuu nagu beeray jacaylka sheeko-faneedda, waxase iigu horreysay in aan la kulmo 2004tii iyo London. Saaxiibtinnimo tii ugu sarreysay ayaa noo bilaabatay, ka dib waxaan noqonnay jaal hawl iyo sheeko-wadaagba ah. Geeridiisu waxay ku reebtay xanuun. Soomaalida waxaa ka tagay aqoonyahan dabeecad wanaagsan, mufakir aragti dheer, hoggaamiye hay'ado dhisay, macallin dad badan wax baray. Eebbe ha u naxariisto, ummadda uu ka tagayna beddel kheyr qaba. Aamiin.

Cabdiraxmaan Maxamed Abtidoon,
Wakiilka AGA ee Yurub, London (UK)

Derbi nagu soo Dumay

Reer Daahir Afrax haddaannu nahay, geerida Dr Maxamed Daahir waxay nooga dhigan tahay darbi nagu soo dumay. Waxay ahayd tii noogu xanuunka badnayd. Tiir weyn baa naga baxay. Marxuumku wuxuu ahaa nin ummudeed, waddani ah, daacad ah, musuqmaasuqa neceb, ummaddu inay dhaqankeeda haysata jecel. Ilaahay haw naxariisto.

Nuuradiin Daahir Afrax
Columbus (USA)

Waari Mayside War ha kaa Hadho

Geeridda innagu timid waxaynu uga tacsiyadaynaynaa qoyskii Maxamed Daahir Afrax, qoysaska hal-abuurka, kuwa qoraalka iyo intii uu ududbdhexaadka u ahaa, iyo dhammaanba ummadda Soomaali-yeed oo uu ka wada baxay. Isna Eebbe naxariis badan iyo denbi dhaaf ha ku siiyo abaalka uu ummaddaa u galay. “Waarimayside war ha kaa hadho” wixii ka hadhay in la daryeelo oo la sii wado baa duca joogta ah u ah.

Macallin Siciid Saalax Axmed
Maqaawiirta AGA
Wakiilka AGA ee W/Maraykanka

Hawlkar iyo Qoraa Hibo leh

Wuxuu ahaa haldoor naftiisa u hibeeyay u adeegidda bulshada. Markaad dib u fiiriso waxqabadkii Dr Afrax waxaa kuu muuqaanaya baaxadda aragtidiisa iyo weynida hawlkarnimadiisa. Waxaa lagu xasuusan doonaa inuu ahaa qoraa hibo leh, hormuudna u noqday in Af-Soomaaliga laga dhigto nabad-side walaaleeya Soomaalida. Geeridiisu waxay ka dhigan tahay ceel maaxayay oo guray.

C/Qaadir Ruumi
Wakiilka AGA ee UK, Birmingham (UK)

Dadaal iyo Dulqaad

Alle ha u naxarriistee Dr Afrax si joogto ah ayaan tobankii sano ee u dambeeyay u wada shaqaynay. Tilmaamaha aan ku aqaanay waxaa ka mid ah: degganaansho, dadaal, daacadnimo, dulqaad, dal jacayl, dan guud, damiir-wanaag, dood togan, iyo difaaca afka iyo dhaqanka. Waxyaabaha aan ka bartay Dr Afrax waxaa ka mid ah: u hiilinta afka hooyo iyo hal-abuurkiisa, u heelanaanta shaqada, u hanweynaanta Soomaalinnimada, iyo u dhabar-adayga hawsha.

Macallin Maxamuud M. Cabdullaahi
Agaasimaha Machadka Daraasaadka Af-Soomaaliga & Suugaanta,
Jaamacadda Jigjiga, DDS, Jigjiga
Wakiilka AGA ee DDS

Xeeldheere Saamayn Ballaadhan lahaa

Waa geeri gilgishay bahda qalinleyda iyo halabuurka Soomaaliyeed. Eebbe ha u naxariisto e, Afrax wuxuu ahaa aqoonyahan iyo xeeldheere saamayn ballaadhan ku lahaa afka iyo suugaanta iyo inta danaysaba. Waa in aad loo xusaa saamayntaas.

Saynab Daahir Sharci
SSPEN & AGA, London (UK)

Xilkas aan la Illaawi Karin

Dr. Afrax wuxuu ahaa xilkas isu diray, naftiisa iyo waqtigiisana u hibeeyay, u adeegidda afkeenna hooyo. Wuxuu ururin jiray aqoonyahanka si ay ugu hiilliyaan afkooda hooyo. Wuxuu ahaa ruux aan la illaawi Karin. Ilaahay abaalkiisa ha ka dhigo jannadii Fardowsa.

Dr.Cabdifitaax Nuur Axmed (Ashkir)
Qoraa, SSPEN, Garoowe
W/dowlaha Warfaafinta, Isgaarsiinta & Dalxiiska Puntland

Dadyaqaan Damiir Nool leh

Dr Afrax (AUN) wuxuu ahaa dalyaqaan, dadyaqaan damiir nool leh iyo ilays soo baxay xilli loo baahnaa. Waxaan ku xusuusan doonnaa, sida nafhurnimada lahayd uu u ugu istaagay afkeenna hooyo. Afrax ajashiisaa dhammaatay, arami ayayse reebtay. Rabbi loxodka ha u nuuro.

Nimco Nuur
Helsinki (Finland)

WARAR XUS & XUSUUS

AGA oo Xus iyo Xusuus Muqdisho ugu Samaysay Guddoomiyihii AGA

Munaasabad loogu ducaynayay Guddoomiyihii AGA Dr. Maxamed Daahir Afrax, ayna soo qabanqaabisay Akadeemiye-goboleedka AfSoomaaligu, ayaa 18/10/2021 lagu qabtay Muqdisho.

Ku-simaha Guddoomiyha AGA Xildhibaan Maryan Cariif ayaa ugu horeyntii ka tacsiyaysay geerida Dr. Afrax, waxayna tilmaantay dadaalkii uu ugu jirey hiilka afka Soomaaliga iyo hal-abuurkiisa. Waxaa kale oo ka hadlay masuuliin iyo waxgarad ay ka mid yihiin Guddoomiyaha Guddiga Warfaafinta Baarlamaanka Xildhibaan Khaalid Macow, Xildhibaan Maxamed Cumar Dhalxa, Guddoomiyaha Doorashooyinka Qaranka Md Maxamed Xasan Cirro, Guddoomiyaha Akadeemiyada Cilmiga, Fanka iyo Suugaanta Md C/qaadir (Maax), Guddoomiyaha Golaha Abwaanadda Abwaan Xirsi-Dhuux Maxamed, Taliyaha Ciidanka Cirka S/Guuto Maxamuud Sheekh Cali “Dable Bayloot” iyo masuuliyiin kale. Masuuliintani waxay ka hadleen taariikhdii iyo waxqabadkii marxuum Afrax, waxayna ku taliyeen in meel loogu magacdaro.

La-taliyaha Sare ee Guddoomiyaha AGA Prof. Mustafa Fayruus oo munaasabadaasi soo gunaanaday ayaa u mahadnaqay intii ka soo qaybgashay xuska iyo xusuusta.

Xus iyo Duco Jabuuti loogu Sameeyay Dr. Afrax

Munaasabad loogu ducaynayay Guddoomiyihii AGA, ahna Guddoomiye Sharafeedkii Somali Pen Dr. Maxamed Daahir, uuna soo qabanqaabiyay naadiga Somali Pen oo kaashanaya Wasaaradda Dhallinta iyo Dhaqanka Jabuuti ayaa 21/11/2021 lagu qabtay guriga ummadda ee magaalada Jabuuti.

Wasiirka Wasaarada Dhallinta iyo Dhaqanka Jabuuti Hibo Muumin Casoowe oo munaasabaddaasi ka hadashay ayaa sheegtay in Dr Afrax uu ahaa masuul waqti badan siiyay horumarinta afka hooyo iyo hal-abuurkiisa, iyada oo marxuumka ugu ducaysay inuu Jannada ka waraabiyo.

Sidoo kale, waxaa munaasabaddaasi ka hadlay Danjire Maxamuud Dirir, Marwo Caasho Maxamed Rooble oo ah Wasiirkii hore ee haweenka Jabuuti, Cabdiraxmaan Yaasiin oo la-taliye ka ah Somali Pen, wakiilka AGA ee Jabuuti Dr. Nimcaan C/laahi Qawrax, Abwaan Xaashi C/laahi Orrax iyo masuuliin kale. Masuuliintani waxay faah-faahiyeen taariikhdii iyo hawlihii uu soo qabtay marxuumku.

Masuuliintani waxay marxuumka ugu duceeyeen Jannatul Firdows.

Xarunta Laashin oo Xus iyo Duco u Samaysay Maxamed Daahir Afrax

Xarunta Laashin ayaa 16/10/2021 waxa ay qabatay kulan loogu ducaynayay Dr Maxamed Daahir Afrax. Kuankani wuxuu ka dhacay barta Zoom-ka.

Guddoomiyaha Laashin Md Xuseen ”Wadaad”, Ku-simaha Guddoomiyaha AGA Maryan Cariif, Cabdiraxmaan M. Abtidoon, Prof Cali Jimcaale, Macallin Saciid Saalax iyo masuuliin kale ayaa ka sheekeeyey sooyaalkii Afrax, iyaga oo Alle uga baryay in Jannada ka waraabiyo.

Somali Pen Muqdisho oo Xus iyo Xusuus ugu Samaysay Dr Afrax

Kulan isugu jiray xus iyo duco loogu talagalay Guddoomiye sharafeedkii Somali Pen Dr Afrax, uuna soo qabanqaabiyay naadiga Somali Pen, laanta Muqdisho oo kaashanaya maamulka jaamacadda Green Hope ayaa 24/10/2021 lagu qabtay Muqdisho.

Masuuliinta goobta ka hadlay waxaa ka mid ah madaxa laanta Muqdisho ee Naadiga Somali-Pen Md Cabdinaasir Yuusuf, ku-xigeenkiisa Md Axmed Dhicisow iyo waxgarad kale ayaa faah-faahiyay kaalintii marxuumku ku lahaa u adeegidda afka iyo asaasiddiisii Somali Pen.

AGA oo Qabatay Madal ZOOM loogu Ducaynayay Dr Afrax

Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga ayaa 23/10/2021 waxay qabatay madal loogu talagalay soo bandhiggida waxqabadkii Dr Maxamed Daahir, iyada oo madashaasi lagu qabtay aaladda Zoom-ka.

Ku-simaha Guddoomiyaha Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga Xildhibaan Maryan Cariif ayaa ugu horeyntii halkaasi ka sheegtay in uu Maxamed Daahir ahaa masuul qiimo badan oo ka baxay bahda qorayaasha Soomaaliyeed, iyada oo Alle ugu bariday in uu Jannada ka waraabiyo.

La-tilyaha sare ee AGA Prof Mustafa Fayruus ayaa madashaasi ka soo jeediyay waxqabadkii faraha badnaa iyo taariikh-nololeedii Dr Afrax.

Sidoo kale, waxaa iyaguna halkaasi ka hadlay Wasiirkii hore ee Arrimaha Dibadda Axmed Ciise Cawad, Guddoomiye Ku-xigeenka AGA Dr Cabdinaasir Axmed, Wakiillada Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga ee Maraykanka, Ingiriiska, Jabuuti iyo Dawlad-deegaanka Soomaalida kuwaasi oo ka hadlay taariikhdii Dr Afrax, Alle uga baryay in uu Jannadiisana geeyo.

Munaasabad loogu Duceynayay Dr Afrax oo lagu Qabtay Gaalkacyo

Munaasabad loogu ducaynayay Dr. Afrax, ayna ka soo qeybgaleen masuuliyiin kala duwan ayaa 22/11/2021 lagu qabtay magaalada Gaalkacyo. Wakiilka AGA Galmudug Abwaan Cali-deeq oo ka hadlay munaasabaddaas, ayaa ka warramay taariikhdii iyo waxqabadkii marxuumka. Sidoo kale, waxaa halkaasi ka hadlay madaxdii ka soo qaybgalay oo marxuumka Alle uga bariday inuu Jannadiisa ka waraabiyo.

KORORSO AQOONTAADA AFKA HOOYO

Odhaahyo laga Reebay Dr. Maxamed Daahir Afrax

“Halbawlaha nolosha af kasta waa hal-abuurkiisa”.

“Waxyaalaha afka dila waxa ka mida marka dadka afkaa ku hadla dhallinyaradiisu ay afaf kale ka doorbidaan oo kooda yasaan”.

“Ummadi hadday waydo afkeeda waxay waayaysaa aqoonteedii”.

“Ka shaqaynta luqadda iyo suugaantu waa sida jiritaanka Soomaalida lagu badbaadin karo”.

“Aqoonta fureheedu waa afka, dhaqanka iyo hal-abuurka”.

“Heerka afkaaga aad u adeegsanayso, ama aad ugu hadlayso, wuxuu muujinayaa aqoontaadu inta ay gaarsiisan tahay”.

“Ummad kasta astaanta jiritaankeedu waa afkeeda”.

“Afkaagu hadduu lumo ama wiiqmo ama uu waydoobo awood ma yeelanaysid”.

“Ummad afkeedu dhintay waa ummad dhimatay”.

“Afku waa aalad ay isku badbaadin karto ummaddu”.

“Afku waa hantida ugu qaalisan ee ummadi leedahay”.

“Hooyada iyo ubadkeedu waxa ay wax isu yihiin inta ay is afgaranayaan”.

“Afku waa diiwaan, waa dun, waa dariiq”.

“Afku waa wax nool, wuu dhashaa, wuu koraa, wuu dhumaa, wuu gaboobaa, wuu bukoodaa, wuuna dhintaa”.

“Si aannu isu badbaadinno waa in aan badbaadinnaa afkeenna, suugaantiisa, hal-abuurkiisa iyo dhaxalka uu xanbaarsan yahay”.

“Af-Soomaaligu waa tiirdhexaadka dhaqanka, waa weelka dhaqanka lagu shubo”.

“Hal-abuurku waa halbawlaha nolosha afka”.

“Afku waa xarigga ugu adag ee xajin kara isirka Soomaalinnimo iyo mid ahaanta Soomaalida”.

“Afku waa astaanta jiritaanka ummadnimo iyo haybta dad ahaaneed”.

“Af-Soomaalgu waa diiwaanka keliya ee laga heli karo dhaxalkii sooyaalka ummadda”.

“Afku waa astaanta jiritaanka ummadnimo iyo haybta dad ahaaneed”.

“Afku waa nuxurka Soomaalinimada”.

“Afku hadduu dhinto, aqoontaa dhimanaysa. Aqoontu hadday dhimato horumarkaa dhimanaya; waxaa dhimanaya haybadda, sharafta iyo jiritaanka dadka iyo dadnimadiisa”.

Waxaa soo Ururisay
Macallin Dayax Axmed Iley

SUUGAANTA & HAL-ABUURKA

Mahuraan Baroordiiqdu!

Macallin Siciid Saalax Axmed

Gabaygan waxaa tiriyay Macallin Siciid Saalax Axmed 23/10/2021, Minnesota (USA). Wuxuu ab-waanku ka tiriyay kulan ah duco, baroordiiq iyo milicsi waxqabadkii marxuum Dr Maxamed Daahir Afrax oo lagu qabtay aaladda Zoomka, oo ay soo qabanqaabisay Akadeemiye-goboleedka AfSoo-maaliga, ayna ka soo qaybgaleen aqoonyahan iyo waxgarad kala jooga dunida daafaheeda.

I

Nooluhu majaruhuu togaa, marinka saadaasha
Marna waa bilaw ama dhammaad, moosinkaa taxane
Waa labada maalmood dhexdood, wuxu mudaystaaye
Mugga uu dhashaba waa lidkeed, waxa u meel yaale,
Ma dhammaato geeridu ilaa, maalin sarajooge,
Hadduu meleggu ruux dayn lahaa, Mawle amarkiisa
Nebi Maxamed baa joogi laa, dunida maamuuse,
Qofna mowdku huri maayo oo, waa makalayaaye
Marxuumkaa god galay iyo xuskaa, maqalku diidaayo
Waa Maxamed Daahir Afraxii, mawliga ahaaye.
Bulshada magaca Soomaaliyeed, marin kastay joogto
Alleyle mitaalkuu ahaa, kaalin baa madhane
Geedkii mankiyo ubaxa iyo, midhaha saaraayey
Alleyle waxaa maanta jabay, damal magoognaaye
Malkaduu fadhiyey iyo intuu, kala mildhaabaayey
Waa meel banaanaatay iyo, ceelka maax dumaye
Qalin baa madaadkii ka go`ay, shalay mug weynaaye
Murtidii qoraal curin tiraab, dhawr bog baa maqane.
Haddii uu masuulkii god galay, Maxamed Aw Daahir
Inta meerisaan tabanayaa, maaha tirakoobe
Waxa aan la murugoonayaa, maaha keligaye
Dareenkaan ku maansoonayaa, ma aha kaygiiye
Waxa aad maqlaysaanna waa, idinka maankiine
Maqaawiirta Qalinleyda iyo, AGA mataanoobey
Mahuraanka wadartaa dadnimo, muxubbadii saaqday
Qofba meeriskuu gocanayaan, muhindisoodaaye
Marley waxan is weydiinayaa, muhashadiinniiye
Inta mudan tixraac iyo intaa, wada maruuryaysan
Haddii aan martabadaa dhammaan, meerin kari waayo
Tusaaloyinkaan marinayaa, waa matala guude.
Maahmaahda Soomaaliyeed, ma aha been sheege
Meeshaad martaba waxa la yidhi, waa nin magaciiye
Wax la yidhi wixii muuqda baa, kuu mahiib gala e'
Mahuraanna waa ceel wiyeer, milayga jiilaale.

II

Miciinkii Af-Soomaaligiyo, maadha dhaqankeenna
Madaxweynihii loo irkaday, kaydka madhaxeenna
Mudanow Ismaaciil, hadduu, tegey marxuumkaasu
Maamuuska aad geysatiyo, midhaha aad beerto

Yaa mahadnaqaagii ka qiri, meel kasta adduunka?
Laas biyo macaan baan xunbuli, lagaga maarmayne
Mugucuu ka soo dhaamin jirey, maaxdu yey gudhine
Weli hawl ma daalow hogadu, wayska meeshiiye.
Mucda fulintu waxay daarantahay, mudanka waayeele
Yaa Taaniyow soo malkumi, shirarka meegaaran?
Taariikhda ay soo martiyo, heerarkay miratay
Yaa Xaashiyow marag u noqon, meelmar tebinteeda?
Hibo Muuminey yaa hirgelin, minanka joogtaynta
Yaa mala-awaalkii qorshaha, kala mudaynaaya?
Dhalinyarada miiggani haddey, curiso maankeeda
Qofba miiladuu geli lahaa, yaa u kala meerin?
Yaa Cabdirashiid mihindiskii, hubin midhkii toosan
Nimcaan, yaa mareegaha farsamo, kala macnayn doona?
Mid kaloo la tebi doono oo, maanku gocanaayo
Mufti iyo afshaxan iyo qoraa, iyo masuulkeeda
Murti dhaadhigeediyo wax garad, maansayahankeeda
Yaa mudanka Soomaaliyeed, meel isugu keeni?
Kartidii maqiiqnayd intuu, socod ku maasheeyo
Muqdishiyo Jabuutiba ayaa, maalin wada joogi
Oo mayrac galabeed ku tegi, saddex kaloo meela?
Oo yaa muraad guud ka fulin, madax is weydaarsan?
Miyir-hadalka iyo tooyashada, ereyga miisaaman
Oo yaa u miidaama dayi, xaajo marareecsan?
Goosanka mintida oo dhamman, xarunta moosaaya
Inta miiska soo wada fadhida, ina kaloon muuqan
Yaa Maryan Cariifey tusmada, fuliya maaraynta?
Martisoorka yaa deeqsinnimo, guri muggii buuxin?
Yaa Mustafe Fayruus qorshaha, kula maqaam yeeli?
Yaa madasha iyo tababarrada, maanka wada doojin?
Yaa macallin Gacanow tusmada, marin abbaarteeda
Yaa maamulkeediyo aqoon, AGA marriimaaya?
Raxantaa murtida baahintiyo, wararka meeraysa
Cabdullaahi yuu maalin joog, qori madiixooda?
Yaad Saynabey macallinimo, heli mullaaxdiisa?

III

Meel kalena iyo meelo kale, meel kasta adduunka!
Inta hiilka meertada wadaag, abid ka soo maagin
Qofba meesinkuu raaci jirey, waxa u meel yaalla
Yaa Maxamed Shiikhow Afgudhay, darar ka maalaaya?
Abtidoon, bal yaa xubinta maqan, heli muraadkeeda?
Marwo Saynab ina Daahirey, Maqasha yaa raaci?
oo ubad mudantuu lahaa, maanka korinaaya?
Abtirsiinaduu soo mariyo, dhaaracyada muuqda
Cabdul Cumar Mansuurow adaa, maahir ku ahaaye
Yaa magacuyaallada naxwaha, sugi muftaaxooda?

(Sii raac bogga 15aad)

Taariikhda meertiyo tusmada, milayga sooyaalka
Yaa marin Idaajaa halkay, mudayso suugaantu?
Mullaaxdiyo jillawdaba inaan, maydhax laga diiran
Yaa ereyadaa wada maldahan, kala maljiidaaya?
Yaw maqan Saciid Jaamacow, sheeko masraxeedka?
Oo yaa Rashiidow murtida, mahadhadeed sheegi?
Yaa Maana-faay iyo faceed, magangelyaynaaya?
Meeshii bugtaba yaa bulshada, muujin hagarteeda?
Manhajkaa Af-Soomaaligiyo, macallimiintiisa
Machadkaa Jigjiga wuxu u yaal, muunad gooniya e
Maxamuud, bal yaa qaar la mida, furi mitaalkiisa?
Haddaad Macallin Guush iyo in kale, mudanki soo gaadhey
Oo aad aqoontaa mugga leh, Maxamed taabsiisay
Yaa Maartinow barasha sare, takhasuskaa muujin?
Cid waliba martabad bay tebtaa, meeris gooniya e
Kooxdii malkada bariga oo, kala muquunowdey
Xandulliyo marley waa Gucmudi, muhashadoodiiye
Cabdi Xaashiyow yaad mabda'a, marar la faalayni?
Aadanow muddaba waa muddo e, marar xusuus reeba
Dhaaxaad jidaal wada marteen, wada mushaaxdeene
Dhaaxaad mudayseen shiraac, maayad shaamiya e
Dhaaxaad majarihii badweyn, maylal socoteene
Dhaaxaad mukhuur iyo yohoon, wada majeerteene
Musareen dhacaayiyo xawaal, wada bad maaxdeene
Meexaano kaftankii wax badan, maado curinteeda
Saaxiibbo, muxubbiyo kalgacal, macallinowdeene
Bal maxaad ka tiri geeridaa, Maxamed Aw Daahir?

IV

Aniguna mid ii gaara baan, sii muhanayaaye!
Annagoo qoraal miranaynoo, meel fog kala joogna
Hadduu qalinku kaa yare mergadood, erey u meelweydo
Ama weedhu marareecatoo, murugto hawraartu
Yaa Maxamedow iyo Saciid, maqal is dhaafsiisan?
Haddeyse taladu meermeerto oo, seegto marinkeeda
Yaa macallinow sheeg i oran, meesha xagal daacdey?
Mahdi iyo walaalaha saddexan, maqal ogaalkooda
Waxa aabbahood ugu maqnaa, maanta way garane
Iyagana mitaalkiisii baa, looga meel deyiye.
Haddii uu marxuumkii god galay, Maxamed Aw Daahir
Ma uu dhiman Af-Soomaaligii, waa mugowyahay e
Dhaaxuu mardaadiga xarrago, miiqay weeraha e
Oo uu sarbeebaha maldahan, soohay midabayne
Oo uu murtida weel u tolay, sheeko maangada e
Madhaxuu ka tegey baa habboon, inaan milgaynaaye.
Ninba meel ku foogane haddii, laysu mara tuuro
Afku waa mid qudha ee haddii, hiil la wada muujo

Malkaduu ka foofaba hadduu, helo mudnaatiisa
Hawshii murkucan mayso oo, waa mudhbaxaysaaye.
Murugadu ma baajiso naftii, maalin loo qoray e
Waa lagu minqaadaa adduun, malaha sii raage
Maguur lagu negaadaase waa, meeha aakhiro e
Haddii uu marxuumkii godgalay, Maxamed Aw Daahir
Mahuraan baroordiiqdu waa, madal xusuuseede
Inuu meherad kheyr badan ku jiraan, muran ka taagnayne
Intaasoo muslina baa u furay, marag Ilaahay e
ku manayso Eebbow Jannadu, waa miduu geyo e
Eeebbow ku maamus ducada, waa mid loo qiraye.

***

Kariimku ha kuu Gargaaro
Abwaan Nuxur Sheekh

Habeenkii la soo sheegay geerida marxuum Afrax abwaan Nuxur Sheekh, oo degan Toronto (Canada), waxay ka mid ahayd hal-abuur marti ku ahaa barnaamijka “Madasha AGA ee Horumarinta Afka Hooyo & Hal-abuurkiisa” oo zoom ku baxayay; dareenkii murugada ayay tixdan ugu baroordiiqday marxuumka.

Afraxaw kobocii qoraalka
Waxaad lahayd kaalin weyne
Maxaan kutub kugu xasuusan!
Sidii keyn maanku daaqo
Af baad u ahayd koolkoolshe,
Kayd baad u ahayd dadkeenna
Kulmiya kuligoodna dhawra
Kalkaaliya kii han weyn leh
Ustaad aan kibir aqoonin
Qalinka saaxiib ku faana
Kal furan oo deeq ku caana
Kaalmeeyaha ruuxa baahan
Qaamuusyahaw erayga kaydshay
Kariimku ha kuu gargaaro.
Kurboonaye geeridaada,
Ilaahay kuma kadeedo
La kulan Nebigii la doortay ﷺ
Kashaad ku ahaan mid noole
Jannadda ku dhex qaado raaxo.

Maantana Dayax baa Galbaday

Abwaan Maxamed Beddel X. Maxamuud

Geeridu waa xaq, markase la maqlo hormuudkii bulshada qof ka mid ahaa oo tii Alle u timid, waxa ay reebtaa murugo iyo tiiraanyo maalmo badan maskaxda ku soo noqnoqota. Maalintii la soo sheegay geerida marxuum Maxamed Daahir Afrax, isagoo ka tiiraanyaysan, waxaa tixdan ugu baroordiiqay Abwaan Maxamed Beddel X. Maxamuud**,** Hargeysa.

Maantana dayax baa galbaday
Digtoor Afrax baa god galay
Waxaa damay nuur qalbiga
Tiraabta ku doojin jiray
Dhegaha hadalkii duxliyo
Sheekooyin ku diirin jiray
Murtina ku dabbaali jiray
Wuxuu u ahaa danjire
Afkeenna dadkiisi gabay.
Dabayshu warkay siddaa
Jidhkaygu dubaaxiyoo
Digtoorkii Maana-faay
Docdiisii bannaan.
Wuxuu darandoorin jiray
Hawraar lagu diirsadoo
Daryeelka afkuu ahaa.
Wuxuu diiwaan ku qoray
Murti aan duugoobinoo
Deyrkii hidduhuu ahaa.
Dunjiga Soomaaliyeed
Wuxuu uga dayrin jiray
Inaan dhaqankoodu dumin.
Dir soocna gob buu ahaa
Halyey diran buu ahaa
Nimaan damac qaadinoo
Duunyiyo lacag raadinoo
Iimaanku ku dayranyoo
Sidii damal la hadhsadoo
Dun iyo shaal buu ahaa.
Dabeecadda muuminkiyo
Islaannimo daahiriyo
Diin iyo sharaf buu lahaa.

U Hiilliyihii Afka

Dr Nimcaan C/laahi Qawrax

Maansadan waxaa tiriyay *Dr Nimcaan C/laahi Qawrax,* Jabuuti; wuxuuna ka akhriyay barnaamij xus iyo xusuus ah oo marxuumka Jabuuti loogu sameeyay 21/11/2021.

U hiilliyihii afkiyo
Aabihii hal-abuurkoow
Hadiyaddii Alle na siiyee
Hibadu saarantow,
Ina Daahir Afraxaw
Aakhiro hoygii janiyo
Hilinkii Nabiga raac.

**

Haldoorkii soo baxee
Na hareera joogow
Hawlkarkii mudnaayee
Hanti qaran ahaayow
Geeska kaw hillaacow
Ina Daahir Afraxaw
Aakhiro hoygii janiyo
Hilinkii Nabiga raac.

**

Akaadamiyada hirgashiyo
Somali-Pen hagaajow
Hoggaankii hufnaayee
Hindisaha badnaayee
Hirarka noo tilmaamaw
Ina Daahir Afraxaw
Aakhiro hoygii janiyo
Hilinkii Nabiga raac.

**

Habeen iyo maalintii
Halyeygii roorayee
U holladay afkeennee
Hormarkiisa taagow!
Ina Daahir Afraxaw
Aakhiro hoygii janiyo
Hilinkii Nabiga raac.

**

Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga

Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaligu (AGA) waa xarun aqooneed loo abuuray daryeelka iyo horumarinta Af-Soomaaliga iyo hal-abuurkiisa suugaaneed. Waa madal ay ku bahoobeen dalalka Geeska Afrika ee Soomaalidu degto, AfSoomaaligana lagaga hadlo.

AGA waxaa lagu asaasay dalka Jabuuti bishii Juun 2013. Xarunteedu waa Magaalada Muqdisho, waxayna laamo ku leedahay Magaalooyinka waaweyn ee Geeska Afrika iyo da-lalka qurbaha ee ay aad u joogaan Soomaalidu.

XUS IYO XUSUUS

Marxuum Dr. Maxamed Daahir Afrax

Nus qarni ah hal-abuur iyo waxqabad milgo leh